



CHILDREN'S
AID SOCIETY
of TORONTO

LA SOCIÉTÉ
DE L'AIDE à
L'ENFANCE
DE TORONTO



Sida iyo sababta ay carruurta u gasho daryeelka CAS

Bulshooyinka kaalmada Carruurta Ontario (CAS) waxay masuul ka tahay baarista warbixinada darxumada carruurta, oo sidoo kale loo yaqaan waxyeelayenta iyo dayaca ilmaha. Kanada, darxumeynta carruurta waxa loo la jeeda wixii qof kasta oo kayar 16 jir ah kaasi oon badbaado qabin sababtoo ah isaga oo halis ugu jiraa waxyeelo ama waxa waxyeelayn waalidiintiisa ama daryeelayaashiisa. Maalin kasta hay'addayadu waxay heshaa 120 wicitaan oo ku saabsan walalka badbaadada ilmaha bulshada dhexdeeda. Wicitaanada ku saabsan badbaadada ilmuhu sida badan waxay u qaybsamaan qaybaha soo socda: kuwa la xiriida xadgudubka guriga (35%), tuhunka waxyeelada jireed, niyadeed, ama waxyeelayn u galmood (25%), waalidiin dhibato ka haysato isticmaalka maan dooriyaasha ama maskaxda wax ka qaba kuwaasi oo saameyn ku yeelaneyso awoodda ay u leeyihiin inay daryeelaan ilmahooda (20%), dayaca ilmaha (15%), iyo khilafkhexmara waalidka oo ilmaha halis galinaya ilmaha ama waalidku ayna ka ilaalin karin ilmahooda inay badbaadayaan iyada oo ay ugu wacan tahay habdhaqanada ilmaha oo halis galiyana iyaga lafhaantooda (5%). Cid kasta oo samaysay wicitaan la xiriira ilmaha ama dhallinyar – mahadsanid. Waxaad tahay qayb muhiim ah oo kamid ah tuuladaas marka la eego korinta ilmaha.

Ku dhawaad boqolkiiba 80 wicitaanada CAS ee keenay baaritaan waxay ka yimaadaann 'xirfadlayaal', ay kamid yihiin macalimiin, boolis, dhakhaatiir iyo daryeellada maalintii. Boqolkiiba 20 soo hartay waxay ka yimaadaan deriska, qoysaska, saaxiibada ama meelo aan la magacaabin. Waanu og nahay inayna dadka la fududayn wicitaanadani, laakiin xaqiiqda in aanu helno tirada aanu helay waxay noo sheegaysaa in dadka iyo xirfadlayaasha Toronto ay aad u danaynayaan badbaadada iyo daryeelka carruurtooda.

Marka wicitaan la helo waxa baarnaa ugu yaraan laba xirfadlayaal daryeelka ilmaha ah oo tabobaran. Iyaga oo isticmaalaya qiyaaso gobol ahaan la dhigay ayey dhagaystaan oo waydiiyaan su'aalo gaar ah oo ka caawinaya inay go'aamiyaan heerka halista ilmaha ku aaddan iyo haddii baaris ilaalineed loo baahan yahay. Iyada oo ku xiran darnaanshaha heerka halista jirta, wicitaanada waxa loo baadi-soocaa baaris 'isla markaaba ah' (12 saacadood gudahood) haddii ilmaha waxyeelo gaartay, ama 7 maalmood gudahood haddii ilmuhu halis ku jiro.

2014, CAS Toronto waxay dhammaystirtay 7,052 baaritaan. Ugu dhawaan 2,300, ama wax u dhigma 92 fasal oo carruur ah, ayaa la helay inay ku habboon yihiin qeexista darxumada carruurta ama halis ugu jiraan waxyeelo kaga timaad waalidkood ama daryeeladooda. Dada weynuhu waxay dareensan yihiin CAS inay gayso carruurta ay baarto meel barbaado daryeelo. Xaqiiqdu waxay tahay in marka laga reebo Quebec, Ontario ay leedahay tirada carruurta ugu yar e daryeel la geeyo oo ah boqolkiiba 3. Taasi waxay ka dhigan tahay in boqolkiiba 97 kiisaska CAS baarto, in ilmuhu la sii joogo qoyskooda ama qorshe la sameeyo si loo hubiyo badbaadistooda. Qof kasta oo CAS kastaa ka mid ah wuxuu ku dadaalayaa inuu wax fiican ka sameeyo meeshan, wadashaqeyn muhiim ah si loo gaaroo xiriirtka qaraabada, xigta iyo saaxiibada ee ilmaha. Waa ayeyyooyinka/ awoowyaasha, eeddooyinka/habaryaraha iyo adeerrada/ abtiyaasha, inaadeerta/inaabtida/habarwadaagta iyo xiitaa walaalaha waawayn (oo loo yaqaan daryeelka xigtada), iyo sidoo kale tabobarayaasha, macalimiinta iyo deriska (oo loo yaqaan daryeelka jaalka) kuwaasi oo yaqaan ilmaha oo tallaabana hore ka qaadan karaan si ay ugu soo bandhigaan daryeel ilmahaas, muddada dhaw ama muddada fog. Toronto, aad ayaanu baahi ugu qabnaa xiriirada xigtada iyo jaalka si ay nooga caawiyaan inaanu ku hayno carruurta la jooga qoyskooda iyo bulshadooda.

Marka go'aanku yahay in ilmuhu ay tahay inuu galo daryeelka CAS go'aanka ugu horeysa waxay thay in lugu meeleeeyo qoys sugan., ayna ka mid yihiin , oo ay kujiraan qoysaska soo korsaday. Qoysaska soo korsaday waa qayb muhiim ah oo kamid ah tuuladaas kuwaasi oo caawiya daryeelka carruurteena marka ayna la joogi karayn qoyskooda. Toronto, waxa nagu yar qoysaska barbaarinta. Taasi waxay ka dhigan tahay in carruur badan ku jiraan daryeelkayaga, waxa lagu meelayn magaalada dibaddeeda – meel ka fog qoyskooda, bulshada iyo xaaladaha qaar dhaqankooda sababtoo qabanqaabada daryeelka qoyska barbaarinta, xigtada ama jaalka oo aan Toronto laga heli karin. Tani ma aha xal aan doorbidno. Carruurta Toronto ee daryeelka kujirtaa waxay u baahan yihiin tuuladooda. Fadlan ka feker inaad u tahay waalid barbaarin, qaraab ama jaal ilme kujira daryeel Toronto ah.